



Jamhuuriyadda Somaliland  
**Hay'adda Shaqaalaha Dawladda**  
هيئة الخدمة المدنية بجمهورية صومالييلاند  
**Somaliland Civil Service Commission**

**HAY'ADDA SHAQAALAH DAWLADDA**

**BAAHINTA KAALMAHA SHAQO EE DARAJADA "A"**

---

**1. FAAHFAAHIN KOOBAN**

**Nooca Tartanka:** Tartan Furan oo Ku Dhisan Mudnaanta Aqoonta, Xirfadda iyo Khibradda  
(Merit-Based Competitive Recruitment)

**Kaalinta Shaqo ee la codsanyo Darajada: "A"**

**Habka Codsiga:** Waxaad ka soo codsan doontaa barta Internet ee linkiga hoose (Online Recruitment Portal))

**Xilliga Kama Dambaysta ah (deadline): 10 September 2026, 5:00 pm,**

**2. HORDHAC**

Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Somaliland waxaa la aas-aasay sannadkii 1993, iyada oo waajibaadkeedu shaqo uu salka ku hayo Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Waajibaadka Hay'adda Shaqaalaha Dawladda waxaa saldhig u ah Qodobka 35<sup>aad</sup>, Farqaddiisa 2<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Xeerka Shaqaalaha Dawladda, **Xeer Lr. 97/2022**.

Hay'addu waxay u xilsaaran tahay dhismaha, tayaynta, tababarka, daryeelka iyo dabagalka shaqaalaha dawladda, si loo helo cudud shaqaale oo leh tayo sare, aqoon deegaamaysan, xirfad iyo karti, una horseedda hufnaan iyo horumarrinta adeeg bixinta Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland.

Shaqaalaha dawladdu waa laf-dhabarka bixinta adeegyada aasaasiga ah ee guud ee wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu ay siiyaan muwadiniinta Jamhuuriyadda Somaliland, sidaas darteed Hay'addu waxay masuul ka tahay xaqiijinta in maamulka cududda shaqaalaha lagu saleeyo mudnaan, karti, xirfad, hufnaan, caddaalad iyo isla-xisaabtan.

Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu iyada oo fulinaysa Xeerka Shaqaalaha Xeer, no 2022/97, gaar qodobadiisa 30<sup>naad</sup>, 31<sup>naad</sup>, 32<sup>naad</sup> iyo 33<sup>naad</sup> ayey go'aansatay in shaqo qorista shaqaalaha dawladda lagu saleeyo tartan caddaalad ah iyada oo ay u wada siman yihiin dhammaan muwaadiniinta reer Somaliland.

Iyadoo taas laga duulayo, waxa ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladdu ku dhawaaqaysaa tartan furan oo lagu buuxinayo kaalmaha shaqo ee darajada "A" ee ka bannaan Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dawladda.

Ujeeddada tartanka ayaa ah in la helo tartamayaal leh aqoon, xirfad, khibrad iyo karti ku habboon jagooyinka loo tartamayo. Tartamayaashu waxay ku kala guulaysan doonaan qaabka iyo sida ay uga soo baxaan shuruudaha looga baahan yahay marka ay shaqada soo codsanayaan iyo derajada ay imtixaanka qoraalka ah ka keenaan ee Jamacadaha Dawliga ahi ku qaban doonaan Gobol kasta.

Geeddi-socodka iyo nidaamka tartanku waa mid daahfuran, hufan, caddaalad ah, mudnaan-ku-salaysan (Merit-Based) oo fursad siman siinaya dhammaan tartamayaasha muwaadiniinta ah ee reer Somaliland.

### **3. UJEEDDADA BAAHINTA KAALMAHA SHAQO**

1. In la helo tartamayaal u qalma Kaalmaha shaqo ee Darajada "A".
2. In la xaqiijiyo in shaqaalaha lagu xulayo nidaam ku dhisan mudnaan, karti iyo aqoon.
3. In la helo shaqaale leh xirfado iyo khibrad ku habboon baahiyaha Hay'adaha, Wasaaraddaha iyo Wakaaladaha Dawladda.
4. In la hirgaliyo xeerarka iyo siyaasadda u dejisan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.
5. In Shaqaalaha Dawladda ay ka mid noqdaan dhallinyarada Somaliland ee leh aqoon sare, xirfad sare iyo hufnaan sare.
6. In la xaqiijiyo hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo in fursado siman loogu tartami karo.

7. In codsiyada shaqada lagu maareeyo nidaam casri ah oo Online Recruitment Portal ah.

#### **4. SHURUUDAHA GUUD EE LAGA RABO TARTAMAYAASHA DARAJADDA ‘A’**

##### **(QUALIFICATIONS AND SKILLS)**

**Qofka doonaya inuu u tartamo boosaska shaqo ee Darajada “A” waa inuu buuxiyaa shuruudahan hoos ku xusan;**

1. In uu yahay/tahay Muwaadin Reer Somaliland ah
2. Haysta ugu yaraan Shahaado heer Jaamacadeed ah (Bachelor’s degree) oo ka soo baxday jaamacad la aqoonsan yahay.
3. Celceliska Guud (GPA) tartamuhu waa in aanu ka hoosayn **3.0**. Laakiin tartamayaasha bartay caafimaadka (Medicine) iyo caafimaadka Xoolaha (veterinary) waa in aanu ka hoosayn **2.75** **ivaga.**
4. Tartamaha soo xaraysanaya shaqadani waa in uu haystaa sidoo kale Shahaadada Dugsiga sare oo la aqoonsanyahay ama ka soo baxday Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka.
5. Waa in uu daganyahay gobolka uu ka tartamayo/tartamayso, kaadhka dhalashadana waa in uu ka qaatay isla gobolkaas.
6. Waa in uu leeyahay khibrad shaqo oo ah ugu yaraan 3 sanno ah.
7. Waa in uu soo diraa dhiganihiisa/heeda (CV) oo xusaya khibradaha Shaqo iyo waxbarasho ee tartamaha.

#### **5. HABKA LOO DALBANAYO (HOW TO APPLY)**

Qof kasta oo buuxiyey shuuradaha sare ku xusan, waxa uu bookhanayaa barta Hay’adda Shaqaalaha ee Shaqooyinka lagu cosado oo ah;

**<https://Cscjobs.org>**

**Qof kasta oo codsanaya shaqada deraja “A” waxaa looga baahan yahay;**

- Warqada Codsiga Shaqada kuna cad yahay kaalinta shaqo ee uu codsanayo/codsanayso
- Soo gudbiyaa dhiganihiisa/dhiganheeda (CV-ga) oo leh saddex tixraac (three references)

- Shaahada Jamacadeeda oo la aqoonsan yahay (Bachelor Degree)
- Shahaado Dugsiga sare oo la aqoonsan yahay
- Kaadhka Aqoonsiga -National ID
- Sawir Kur ah oo uu galay/ama ay gashay lixdii bilood ee u danbaysay.

## 6. XILLIGA KAMA DAMBAYSTA AH

Dhammaan tartamayaasha danaynaya jagooyinkan shaqo waxaa lagu wargelinayaa inay codsiyadooda ku soo gudbiyaan **Portal-ka online ah ee <https://Cscjobs.org>** ugu dambayn **10-ka September 2026, 5pm.**

Codsiyada la soo gudbiyo ka dib marka uu dhaco waqtiga kama dambaysta ah **lama tixgelin doono lamana furi doono.**

**Ka codso fursadan shaqo barta internet-ka ee. <https://Cscjobs.org>**